



Dugsiga Grant ardaygii ka socday ee Danny Fisher ayaa ku guuleystay Tartanka Sheekada Runtoo la Sheego

Sheekada bilowgeeda, Danny Fisher waxa uu ku suganyahay hawl mutadawacnimo ah, isaga oo ku deeqaya "dawo ama walax sida sixirka oo kale u daweynaysa dhamaan cudurada waligaabana aad noolaanayso." Gabagabadiina, waxa uu ka soo kabanayay dhaawac isha ka gaadhay kaasoo ka dhigay inuu u ekaado "sidii cirfiid maalmo kooban." Sheekada waxa dhaca ee u dhexeeyey dhibcahaas ayaa ka dhigay dugsiga sare ee Grant inuu ku guuleysto kaalinta koowaad Tartanka Sheekada Runtoo la Sheego waxana la qabtay maalintii khamiista ahayd goobtuna waxay ahayd Grant.

Tartanka, oo loo qabtay ardayda sanadka sadexaad, ayaa waxaa wadjir la isugu keenay labadii kaalimood ee ugu sareeyey Tartanka Sheekada Runtoo la Sheego ee afarta dugsi sare ee ka qaybqaadanayey Tartanka oo kala ahaa (Grant, Lincoln, Franklin iyo Madison). Arday kasta waxaa la siiyey 5 daqiiqo si uu u sheego sheekadiisa shaqsiyadeed taasi oo la socota halkudhega sanadkan: Fahamka wixii dhacay.

Sheekada Fisher, oo cinwaankeedu ahaa "Ishii saarnayd Seefta Laysarka ka Sameysan," ayaa waxaa kuwada jira isaga iyo walaalkii oo iibsanaya Seefto laysar ka sameysan dukaan waxa yaabo gaara iibiya safar dhulka ay ku soomareen ka dib ayoo la socda waalikood ("kuwaasi oo dhab ahaantii udulqaatay waxwalba") iyo gabadh saaxiib la ah. Dabiiciyan, Danny iyo walaalkii labadooduba waxay xiisaynayaan ku ciyaarista seefta layserka ka sameysan, laakiin isha Danny ayaa dhibaato ka soo gaadhay ciyaartii.

"Si ka duwan Fahamka wixii dhacay, ma anan ahayn 20/20 dhowr maalmood," Danny ayaa dhahay. "Laakiin laga yaabee wax waliba wuxuu noqday sidii dhab ahaantii loogu talagalay."

TroodonAlthoff, oo ah arday sanadkii ugu dambeeyey maraya dugsida Franklin ayaa galay kaalinta labaad. Troodon ayaa ka sheekeeyey sheeko ku saabsan ku biiristii dugsida hoose, intaa ka dibna isku dayey inuu ka tago kooxda Dagaalyahanada Bisadaha (a warrior Cats club), kuna soo gunaanaday cashar murugo iyo farxad xanbarsan oo ku saabsan saaxiibtinimada.

Tartamayaasha kale waxay kala ahaayeen Ivy Letherwood oo ka socday Franklin; Jina Lim iyo Lisa Burke ka socday Lincoln; Ellen Lovre oo ka socday Grant; iyo Tyler Horan iyo Wyatt Mejia-Lopez oo ka socday Madison.

Xaakimiintu waxay ahaayeen dad xirfad u leh xaga sheeko sheegista ku waasoo ku qiimeeyey tartamayaasha tayada iyo sida sheekooyinkooda ay u soo gudbiyeen. Tartanka Sheekada Runtoo la Sheego waa barnaamij ay leedahay Maktabadaha PPS.

[Eeg Tartanka Sheekada Runtoo la Sheego oo dhamaystiran](#) (Digniin: waxaa ku jira luuqad qayaxan oo aan wanaagsanayn)